

# BE A BATTERY HERO

NOQO HALYEEY BAYTARI

Dhig baytariyada meeshooda.

Baytariyada lagu tuuro qashinka ama dibu-warshadaynta ayaa dalooshami kara ama burburi kara waxayna sababi karaan dab ka dhasha xarumaha qashinka.

## Halkee bay baytariyada ku dhuuntaan?

Haddii uu shidmo, cod sameeyo ama dhaqaaqo xarig la'aan, waxa ku jira baytari. Baytariyada ayaa sababi kara dab marka ay ku dhammaadaan qashinka ama gawaarida dib-u-warshadaynta. Ogaanshaha meesha laga helo baytariyada waa tallaabada ugu horreysa ee qashin qaadista habboon ee baytariga. Ha u oggolaan baytariyada inay kaa soo gudbaan.

### Batanka

Baytariyada batanka leh lama buuxin karo oo waa in la tuuraa marka dabku ka dhammaado. Waxaa laga heli karaa qashaafadaha, saacadaha guriga iyo saacadaha gacanta, qiiq dareemayaasha, iyo elektiroonigga kale ee guriga ee badan.



### Nickel-cadmium (Ni-Cd)

Dib ayaa loo buuxin karaa ilaa 1000 jeer waxaana ku jira cadmium, oo sun ku noqon karta deegaanka. Waxaa laga heli karaa qalabka korontada, nalalka waddooyinka jardiinada iyo gawaarida meelaha fog laga hago.



### Lithium-ion (Li-ion)

Waxay ku fiican tahay aaladaha dabka aadka u isticmaala. Waxaa laga heli karaa qalabka korontada, taleefannada gacanta, labtob-yada, jaarjaarada la qaadan karo iyo alaabta carruurto ku ciyaarto.



### Nickel-metal hydride (Ni-MH)

Waxay si fiican ugu shaqaysaa aaladaha dabka aadka u isticmaala waxaana dib loo buuxin karaa ilaa 1000 jeer. Waxaa laga heli karaa qalabka korontada ku shaqeeya, raadiyaha laba-geesoodka ah, kaamirooyinka dhijitaalka ah iyo taleefannada aan xadhkaha lahayn.



### Kuwa Kale

Batariyada yar-yar ee xidhan iyo kuwa leedhka asiidha leh (SSLA/ Pb) waa laba nooc oo baytariyaal ah oo ay tahay in si fiican loo tuuro. Waxaa laga heli karaa aaladaha gargaarka degdegga ah, waxyaabaha ay carruurto ku ciyaaraan, nidaamyada amniga iyo gaari curyaanka.



Noqo halyeey baytari oo keen dhammaan baytariyada la isticmaalay oo dhan meel lagu rido oo kuu dhow.

Wixii macluumaad dheeraad ah iyo si aad u hesho goob la dhigo booqo:

[co.washington.mn.us/batteries](http://co.washington.mn.us/batteries) | [hennepin.us/batteryrecycling](http://hennepin.us/batteryrecycling) | [ramseycounty.us/HHW](http://ramseycounty.us/HHW)